



Office of Public
Prosecutions
Victoria



Victims &
Witnesses

Adeegga Kaalmada Dhibanaha iyo Markhaatiyada



Kala xiriir

T: (03) 9603 7425

T: 1800 641 927 (toll free)(TTY - 133 677)

E: vwas@opp.vic.gov.au

W: opp.vic.gov.au/victims-witnesses

Cidda aan nahay iyo waxa aan sameyno

- Adeegga Caawinta Dhibanaha iyo Markhaatiga (VWAS) waa qayb ka mid ah Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud (OPP). OPP waxay ku maxkamadeysaa dambiyada culus maxkamadda Victoria.
- Waxaan nahay adeeg takhasus u leh shaqaalaha bulshada oo fahansan habka cadaaladda dembiyada.
- Waxaan si wadajir ah uwada shaqeynaa qareennada OPP si aan macluumaad iyo taageero u siino dhibbanayaasha qaangaarka ah iyo markhaatiyada dambiyada culus, inta lagu guda jiro hawsha maxkamadda.

Sidee laguula dhaqmi doonaa?

Dhibane ahaan ama markhaati ahaan, waxaad filan kartaa in shaqaalaha OPP ay kuula dhaqmaan si ixtiraam leh, ixtiraam iyo sharaf leh mar walba. Waxaan kaloo filaynaa inaad ula dhaqmi doonto shaqaalaha OPP si xushmad leh, ixtiraam iyo sharaf leh.

Ma shaacin doono macluumaadkaaga shakhsiyeed, oo ay ku jiraan cinwaankaaga iyo lambarka taleefankaaga, marka laga reebo si waafaqsan Xeerka Ilaalinta Xogta 2014.

Waa maxay macluumaadka iyo taageerada ay VWAS bixin karto?

Waxaan ku siin karnaa macluumaad ku saabsan:

- habka maxkamadda
- Xuquuqdaada la xiriirta nidaamka maxkamadda
- xaaladda arrinta iyo taariikhaha dhageysiga maxkamadda
- caddayn bixinta, iyo waxa aad filan karto inta lagu guda jiro hawsha maxkamadda
- buuxinta Bayaanka Saameynta Dhibanaha
- Maxkamadda Gargaarka Dhibanayaasha
- Dambiyada, Diiwaanka Dhibanaha iyo u gudbinta Guddiga Sii-daynta sharafeedka Dadka Waaweyn.

Waxaan sidoo kale awoodnaa:

- inaan ku siino taageero iyo gargaar markaad u baahato
- kula kulanno ka hor dhegeysiyada waaweyn ee maxkamadda oo aan ku taageerno inta lagu jiro waqtigan, gaar ahaan haddii aad dareemeysid welwel
- kugu soo wareejino anagoo kusoo kala tuseyno maxkamadda halkaas oo arrinta lagu dhegeysan doono oona kuu sharaxno doorka shaqaalaha maxkamadda
- kaaga jawaabno su'aalo kasta oo aad ka qabto nidaamka maxkamadda
- kaala hadalno wixii welwel ah ee aad ka qabto ammaankaaga inta aad maxkamadda joogto ama caddayn bixinayso
- suaalo ku weeydiino dhageysiga maxkamadda kabacdi
- kuula diyaarino garyaqaanka OPP inuu ku siiyo turjubaan
- kuu gudbino hey'ado kale si aad u hesho taageero dheeraad ah.

U adeegidda caddaaladda.
U adeegida bulshada.